

MAXAA DHACAAYA INTA HAWSHU SOCOTO?

AMARKA KU MEEL GAARKA AH

- Waxaad buuxin doontaa foomam waxaadna ka codsanaysaa maxkamadaha Amar Ilaalinta oo Ku meel gaar ah oo sii jira 14 maalmood. Waa arrin fiican in la helo ciwaanka iyo taariikhda dhalashada eedeysanaha.
- Waxaa lagaa codsan doonaa inaad qeexo dhacdadii ugu dambaysay iyo/ama hanjabaada ku aadan rabshada qoyska iyo taariikhda rabshada qoyska.
- Garsoore ama guddoomiye ayaa akhriin doonaa warqadahaaga, waxayna ku waydiin karaan su'aalo, kadibna waxay go'aan ka gaari doonaan inay ku siiyaan ama kuu diidaan Amarka Ku meel gaarka ah.
- Dhageysi ayaa la qaban doonaa labo asbuuc gudahood, oo waqtiga la qabanaayo ay maxkamad go'aan ka gaari doonto ama waxaa la diidi doonaa Amarka Ilaalinta oo dhaqangal ahaan doonaa hal sano ama in kasi badan.
- Inta lagu jiro labadaan asbuuc, eedeysanaha waxaa loo geyn doonaa Amarka Ku meel gaarka ah iyo Codsiga labadaba iyo ogeysiiska taariikhda ballanta dhageysiga buuxa.

AMARKA BUUXA

- Dhageysigaan, maxkamada ayaa diidi doonta Amarka Ilaalinta oo dhaqangal ahaan doonaa hal sano ama in kasi badan. Waa muhiim inaad timaado dhageysigaan xataa haddii eedeysanaha aan ogeysiiska loo geyn.
- Maxkamadu waxay adiga iyo eedeysanaha waydiin doontaa inaad ka hadashaan xadgudubka iyo/ama hanjabaada lagu qeexay Codsiga. Waxaad xaq u leedahay (laakiin ha akhriin) inaad hesho qareen kasoo qaybgala.

Tilmaamo Muhiim ah:

- Waqti fiican imoow oo soo qaado dhammaan warqadahaaga.
- Ha soo ka xeysan carruurtaada
- Si toos ah ula hadal garsooraha, hala hadlin eedeysanaha.
- Sheeg runta.
- Muuji naxariis, qadarin, oo si cad u hadal.
- Soo qaado warbixinada booliska iyo caddeymaha, haddii aad haysato.
- Hawshu waxay socon kartaa 2-4 saacadood sidaas ooowgeed fadlan daryeelka ilmaha haddii ay macquul tahay.

MAXAA DHACAAYA HADDII AMARKA LAGU XADGUDBO?

Wac 911 isla markiiba! Tus sarkaalka laanta sharci fulinta nuqul sax ah oo ah Amarka Ilaalinta. Haddii eedeysanaha loo geeyay ogeysiiska (ama uu joogay dhageysiga kama dambeysta ah si uu u helo amarka), isaga ama iyada waxaa laga yaabaa in isla markiiba la xiro ama la siiyo digniin.

Amarka Ilaalinta ee buuxa ayaa ka dhaqan gala dhammaan 50 ka gobol, Degmada Columbia, Tribal Lands,, iyo xaduudaha Mareykanka.

MALA HELI KARAA CAAWIMAAD KU AADAN NIDAAMKA?

Barnaamijka u doodista Amarka Ilaalinta waa nooc isku dhafan - oo bixiya adeegyo shaqsi iyo mid muuqaal ah labadaba. Barnaamijkeenu wuxuu bixiyaa adeegyada lagu helo ballamaha la qabto. Ballamaha waxaa loo qabsan karaa si shaqsi ah inta lagu jiro saddexda saac, adoo lagu qabsanaayo taleefoon ama iimayl. U doodayaashu waa qareeno sidaas ooowgeedna ma bixin karaan tallo sharci. U doodayaasha barnaamijkaan waxay bixin karaan caawimaada soo socota:

- Gacan ka geysashada xareynta amarka ilaalinta, codsiga dib u cusbooneysiinta iyo/ama codsiga wax ka badelka.
- Macluumaad iyo gudbinta adeegyada hay'adaha bulshada
- Waxbarashada iyo diyaar garoowga hore kahor iyo kadib dhageysiyada maxkamada

Waqti kasta ka hor taariikhda uu dhacayo Amarka Ilaalinta, waxaad ku dib ugu laaban maxkamada waxaadna codsan kartaa in amarka wax laga badelo ama la joojiyo. La xariir Barnaamijka U doodista Amarka Ilaalinta si aad u hesho macluumaad.

SHURUUDA ADEEGGA


Barnaamijka U Doodista Amarka Ilaalinta wuxuu bixin karaa adeegyada ku qoran Amarada Ilaalinta/Kahortaga Xadgudubka guriga ka dhaca. Sababo la xariira xajmiga barnaamijka barnaamijkeena wuxuu kaliya bixin karaa caawimaada ay helaan noocyadaan dadkaan ee soo socda ah:

- Lamaanaha ama lamaanihii hore
- Shaqsiyaadka ilmaha wadaaga
- Shaqsiyaadka jira 15 sano iyo kasi wayn ama ka dhaxeeyeen ama uu hadda ka dhaxeeyo xiriir shukaansi
- Shaqsiyaadka dacwada u xareynaya ilmahooda kana dacwoonaya laamaanaha hadda ama lamaane hore
- Shaqsiyaadka dacwada u xareynaya ilmahooda kana dacwoonaya waalidka hadda ama lamaane kale xiriir kala dhaxeeyay

Rugta Caafimaadka Dhibaatooyinka: 206-461-3222

Laynka Gargaarka DV:

206-737-0242



KING COUNTY 

BARNAAMIJKA U DOODISTA AMARKA ILAALINTA

XAFIISKA GARSOORAHA DACWADA QAADAYA

GOOBAHA

Qolka Maxkamada ee King County
Qolka C213
516 Third Avenue
Seattle, WA 98104

Xarunta Caddaalada ee Deegaanka Maleng
Qolka 2B
401 Fourth Avenue N.
Kent, WA 98032

SAACADAHA XAFIISKA:

Isniin	Talaado	Arbaco	Khamiis	Jimce
Kent waxay furan tahay	XIRAN YAHAY (Oonleen oo kaliya)	Kent waxay furan tahay	Seattle waxay furan tahay	Kent waxay furan tahay
10subaxnimo-12duhurnimo-1duhurnimo-4galabnimo		10subaxnimo-12duhurnimo-1duhurnimo-4galabnimo	10subaxnimo-12duhurnimo-1duhurnimo-4galabnimo	10subaxnimo-12duhurnimo-1duhurnimo-4galabnimo

Xogta xiriirka:

Taleefoonka: 206-477-1103

limaylka: protectionorder@kingcounty.gov
Fadlan booqo: www.protectionorder.org

SIDEE KU HELI KARAA AMARKA ILAALINTA?

Haddii adiga ama carruurtaadu la kulantaan xadgudub ka dhaca guriga oo uu geysto qof ka tirsan qoyska ama xaafada, waxaad codsan kartaa Amarka Kahortaga Xadgudubka guriga ka dhaca.

1 XADGUDUBKA GURIGA KA DHACA

waxaa lagu qeexaa:

- Waxyeello jireed, dhaawac jireed, dhibaateyn ama aflagaado
- Geysashada fal baqdin keenaya sida waxyeello jireed, dhaawac jireed ama dhibaateyn
- Xadgudubka galmada
- Xakameyn Joogto ah

2 XUBNAHA QOYSKA AMA XAAFADA

waxaa lagu qeexaa:

- Lamaanaha ama lamaanihii hore
- Shaqsiyaadka ilmaha wadaaga
- Dadka waawayn ee dhiiga wadaaga ama isqaba
- Dadka waawayn oo hadda ama horey u wada deganaa
- Shaqsiyaadka jira 15 sano iyo kasii wayn ama ka dhaxeeyeen ama uu hadda ka dhaxeeyo xiriir shukaansi
- Shaqsiyaadka qaraabada ah ama waalidka-ilmaha sharci ahaan xiriirka leh

WAA MAXAY QIIMAHA AMARKA ILAALINTA?

Waxba.

Majirto khidmo la iskaga qaado buuxinta. Waxaa lagu siin doonaa nuqulada aad u baahan tahay ee ah amarka ayadoon wax lacag ah lagaa qaadeyn.

WAA MAXAY AMARKA ILAALINTA?

Amarka ilaalinta waa amar madani ah oo dadka geysta falalka dembiga ah ka mamnuucaya inay geystaan xadgudub ama hanjabaad dheeraad ah.

AMARKA ILAALINTA WUXUU:

- Ka mamnuuci karaa eedeysanaha inuu geysto falal dambi ah oo la xariira xadgudubka guriga
- Eedeysanaha ka saari karaa guriga ama hooyga qofka dacwada gudbinaaya ee ay wadaagaan qofka dacwada gudbinaaya iyo eedeysanaha
- Ka mamnuuci karaa eedeysanaha geysashada dhibaateyn iyo ula xariirida qofka dacwada gudbinaaya (si shaqsi ah) iimayl, taleefoon, boosto, xiriirka loo marsiiyo qof saddexaad, dugsiga, goobta shaqada)
- Masuuliyada ilmaha yar dusha u saari karaa hal waalid, wuxuu dejin karaa booqasho ku meel gaar ah, wuxuuna hal waalidk ka mamnuuci karaa inuu masuuliyada farageliyo
- Eedeysanaha ku amri karaa inuu gacan ka geysto daaweynta ama la-talinta
- Eedeysanaha ka mamnuuci karaa ka saarista carruurta maxkamada xukunka
- Eedeysanaha ku amri karaa inuu bixiyo kharashka ka dhashay amarka

AMARKA ILAALINTA MA:

- Amri karo masruufka ilmaha
- Amri karo dakhliga dayactirka
- Ma u qoondayn karo hantida labada dhinacba midkood
- Sameyn karo masuuliyad abadiyan ah ama cid gaar ah mulkiyada guriga ma siin karo

“

“U doodista nidaamka dhibanaha waxaa lagu horumariyaa korna loogu qaadaa fursadaha lagama maarmaanka u ah xoojinta qorshayaasha badqabka ee dhameystiran waxaana awooda lagu saaraa in dhibanayaasha dhammaan dareemaan ammaan.”

”

- Jill Davies, Xarunta Ilaha Qaranka ee Rabshadaha Guriga ka dhaca

SIDEE U HELAA AMARKA ILAALINTA?

Waxaad Amarka Ilaalinta ee Ku meel gaarka ah ka dalban kartaa Maxkamada Sare ama maxkamada degmada ama ismaamulka ee kuugu dhaw. Marka la eego qaar kamid ah marxaladaha Amarkaaga Ilaalinta ee Ku meel gaarka ah ayaa loo wareejin karaa Maxkamada Sare si loo qabto dhageysiga Buuxa ee Amarka.

MAXKAMADA SARE

Qolka Maxkamada ee King County
Qolka E-607
516 Third Avenue
Seattle, WA 98104

Xarunta Caddaalada ee Deegaanka
Qolka 2C
401 Fourth Avenue N
Kent, WA 98032

OONLEEN

BARTA AMARKA ILAALINTA (POP)



MAXKAMADA DEGMADA

Wac Laynka Wicitaanka Dhexe ee Maxkamada Degmada King (206) 205-9200 si aad u hesho macluumaad ku saabsan ka xareynta Amarka Ilaalinta maxkamad degmo oo kasta: Kent, Burien, Bellevue, Issaquah, Redmond, Shoreline, ama Seattle.

MAXKAMADA ISMAAMULKA

Fadlan wac qolka maxkamada ee ismaamulka ee magaaladaada si aad u hesho macluumaad ku saabsan sida loo xareeyo codsiga. Fadlan ogsoonoo in degmooyin badan oo yaryar ay kuu gudbin doonaan Barnaamijka U doodista Amarka Ilaalinta ee Maxkamada Sare si ay kuugu oggolaadaan adeegyada u doodista oo aan inta badan laga helin magalooyinka yaryar.